



ADSS Cymru

Yn arwain Gwasanaethau
Cymdeithasol yng Nghymru

Leading Social Services in Wales

Bayaan ka socda Agaasimeyaasha Adeegyada Bulsheed - Wanaajinta habka aan u bixinno daryeelka bulsheed iyo taageerada

Waxaa hadaf noo ah in aan adeegyada daryeelka bulsheed iyo taageerada ugu tayo sarraysa siinno dhammaan qof walba oo iyaga u baahan, waxaan og nahay in dad farabadan ay, mar uun noloshooda, u baahan doonaan caawimo iyo gargaar dheeraad ah.

Hawlgelinta aan samayno waxaan ku ogaannay in dad farabadan oo ka soo jeeda bulshooyin kaladuwan aanay ka war haynin daryeelka iyo taageerada diyaar u ah ama cidda ay la xiriiri karaan si ay gargaar u weydiistaan. Waxaan weliba garanaynaa in jawaabcelintayada aanan marwalba lagu aqoonsanin duruufta ama xaaladda shakhsi ahaaneed ee gaar u ah shakhsiga ama fahanka buuxa ee dhaqanada iyo aragtiyaha kaladuwan.

Annagoo u hoggaansan oo maanka ku hayna in aan si joogto ah u wanaajinno adeegyada bulsheed, waxaan si faahfaahsan u baarnay caqabadaha iyo caqaladaha ay la kulmeen dadka ka soo jeeda bulshooyinka jinsiyadaha laga tiro badan yahay markii ay isku dayeen in ay helaan ama isticmaalaan adeegyada. Waxaan isku tiirinnay cilmibaaris lagu sameeyey waddanka oo dhan, waxaan la hadalnay dadka ku jira bulshooyinka iyo ururrada la shaqeeya dadka ka soo jeeda koox jinsiyad laga tiro badan yahay. Waxay tani annaga na ogaysiisay in aan samayn karno wax intaas aad uga badan si aan uga wacyi gelinno daryeelka iyo taageerada diyaarka ah iyo si aan u wanaajinno waayaha uu helo ama dhacdooyinka uu la kulmo qof walboo gargaar codsada.

Waxaan u hoggaansami doonnaa in aan casharkan dhaqan gelinno. Waxay taasi ka dhigan tahay soo ogaanshaha habab ka fiican oo dadka lagula xiriiro, taasoo aanan marwalba ahayn toos ahaan laakiin lala sameeyo loona maro shakhsiyaadka iyo ururrada la shaqeeya dadka ku jira bulshooyin kaladuwan. Waxay taasi weliba ka dhigan tahay hubinta in xoogga shaqaalahayagu ay si ka fiican u fahansan yihiin dhaqanada iyo waayaha ama dhacdooyinka lala kulmo ee kaladuwan iyo in daryeelka iyo taageerada tan lagu matalo ama lagu muujiyo. Waxaan weliba og nahay in aan u baahan nahay in aan samayno wax taas aad uga badan si aan u gaarno dadka ku jira bulshooyin kaladuwan si aan uga helno aaminaad iyo kalsooni.

Dadku waxay rabaan in ay xulasho iyo maamul ka helaan daryeelka iyo taageerada la siiyo iyo in ay sida ugu fudud ee suurogal ah u heli karaan ama u isticmaali karaan adeegyada. Waxaa ugu ahmiyad badan xiriirka ka dhexeeya dadka annaga naga mid ah ee adeegyo bixiya iyo shakhsiga taageero u baahan, daryeelhiisa iyo qoyskiisa. Waxaan u hoggaansan nahay in aan wax sii wanaajinno waxaan rabnaa in aan idinla shaqayno adiga iyo ururrada bulshada si aad annaga nooga caawisaan in aan u jawaab bixinno si ka dhakhso badan annagoo si ka fiican u fahansan waxa muhiimka ah.

Warbixinta aan soo saarnay ayaa aasaas u ah tallaabada ay qaadi doonaan dhammaan dawladdaha hoose si ay u wanaajiyaan habka aan ku bixinno daryeelka bulsheed iyo taageerada aan siinno bulshooyinka jinsiyadaha laga tiro badan yahay.